



OTTAWA POLICE SERVICE  
SERVICE DE POLICE D'OTTAWA

*Working together for a safer community  
La sécurité de notre communauté, un travail d'équipe*

# Xaaska/Saaxibka la Dhibaateeyo



Qaybta Xaaska/Saaxibka la Dhibaateeyo  
613-236-1222, khadka. 5407

[ottawapolice.ca](http://ottawapolice.ca)

# Dhibaateynta Xaaska/Saaxibka waa Dembi

Waa sharci darro in uu qof dhibaato gaarsiiyo qof kale. Kuma xirna cidda dhibaataada geysaneyso — xaaska, saaxib hore, qof jinsiga kale ah ama isku jinsi, ama qof kasta ay idinka dhexeysay xiriir soke — ma aha in qof la dhibaateeyo. Waxaad xusuusataa in aadan khaladka adigu lahayn, sidaa darteed mas'uul kama tihid sida uu u dhaqmo qofka kale. **Waxaa ku caawini karaan booliska iyo bulshada deegaanka.**

Inkastoo ragga iyo dumarka ay labaduba noqon karaan kuwo ay dhibaato ka soo gaarto xaaska/saaxibka, balse badanaa, rabshadaha noocan ah waa kuwo ay ragga ku dhibaateeyaan dumarka. **Booliiska la soo waco waa tallaabo habboon** ee lagu joojin karo rabshadda. Booliiska ayaa ka mas'uul ah dhaqangelinta sharciga waxayna si toos ah wax uga qabtaan falalka hoos yimaad *Xeerka Ciqaabta*. Falalka la xiriira *Xeerka Ciqaabta* waxay noqon karaan kuwo fudud sida dharbaaxyada ama kuwo culus sida dilka. Falalka kale ee dembiyada waxaa ka mid ah kufsiga, hanjabaad ah dillka ama dhibaato jirka la gaarsiiyo, xorriyad ka qaadidda awoodda la sheegto, dhibaateynta/dabagalka, falalka dembiyada ee la xiriira hantida la jabsado ee la galo.

## Qaybta Xaaska/Saaxibka la Dhibaateeyo waxay u adeegtaa dadweynaha waxayna:

- baaraan khilaafaadka iyo dhibaatooyinka qoyska;
- baaraan helitaanka amarka iyo haysashada carruurta, iyo weliba Waalidka la afduubo; iyo
- baaritaanada dhibaatooyinka dembiyada ah ee ku lug leh ku xadgudubka xaaska/saaxibka.

# Marka Booliiska loo Waco

Waxaa suuragal ah in aad booliiska u wacday. Caadi ahaan, waxaa suuragal ah qof daneynayo oo reerka ama deriska ka tirsan in uu booliiska u wacay. Si kasta ha noqoto, booliiska waa ay imaanayaan iyagoo baaritaan sameyn doona.

## Sarkaalka booliiska wuxuu:

- kuu sharraxayaa nidaamka warbixinta iyo baaritaanka,
- Ku siinayaa lambarka galka ee “warbixinta dhacdada,”
- haddii loo baahdo, sarkaalka khibradda leh wuxuu qaadayaa sawirrada dhaawaca,
- kaa caawinayaa sidii aad halkaasi uga tagi lahayd ama wuxuu kuu kaxeynayaa hoy badbaado,
- ku siinayaa magacyadooda, lambarradooda iyo halka aad kala xiriiri karto, iyo
- haddii loo baahdo, wuxuu dartaada ula xiriirayaa barnaamijka Gargaarka Dhibaatooyinka Dhibbanaha (VCARS) ama adeegyada kale.

Haddii aad u cabsi qabto badbaadaada, waxaad la socodsiiisaa sarkaalka booliiska.

**Ma aha in aad adigu dacwad gudbiso.** Haddii ay jiraan waxyaabo macquul ah oo lagu aamini karo in uu dembi xadgudub ah uu dhacay, sharciga ayaa booliiska farayo in ay dacwadda gudbiyaan. Haddii uu qofka dhibaataada geystay halkasi joogo, waa la xiri doonaa iyadoo dacwad lagu soo oogi doono. Haddii kale, waxay booliiska ku dadaalayaan sidii ay u heli lahaayeen oo loo xiri lahaa.

Xittaa haddii ay san booliiska dacwadda ku soo oogin, waxay buuxinayaan warbixinta. Haddii aadan dacwad ka soo gudbin, waxaad soo gudbin kartaa Ashtako Gaar ah. Waxayna arrintaan keenaysaa in garsooraha nabadda loogu tago xarunta maxkmadda (oo ku taal 161 Elgin Street ee gudaha Ottawa) si loo codsado in dacwad adigu dartaada loo gudbiyo. Waxaa lagaa doonayaa in aad Garsooraha Nabadda u keento warbixintii dhacdada koowaad ee booliiska.

Marka uu reerka leeyahay carruur waxaa arrinta ku saabsan rabshadaha qoyska la ogeysiinayaa The Children’s Aid Society of Ottawa (Hay’adda Gargaarka Carruurta ee Ottawa).

# Marka Dacwad la Gudbiyo

Barnaamijka Gargaarka Marqaatiga/Dhibbanaha (VWAP) ayaa arrinta soo galayso islamarka booliiska ay dacwadda gudbiyaan. Waxaa kula soo xiriiri doonaan shaqaalaha si ay kuu siiyaan macluumaadka ku saabsan nidaamka maxkamadda iyo kiiskaaga gaarka ah. Sidoo kale adiga ayaa hore ula xiriiri kara haddii aad qabto su'aalo ku saabsan nidaamka maxkamadda (waxaad eegtaa Liiska Khayraadka Bulshada).

Haddii aad qabto wax su'aalo ah, ama aad doonayso gargaar dheeraad ah ee ku saabsan baaritaanka kiiska, waxaad la xiriiri kartaa Baaraha kiiska loo xilsaaray. **Waxaad fadlan la socodsiiisa booliiska haddii aad beddesho cinwaankaaga ama lambarkaaga taleefoonka** (si ay kuugu soo sheegaan horumarka laga gaaray dacwadda ama dhacdooyinka).

Sidoo kale, Qaybta Dhibaatooyinka Dhibbanaha ee Adeegga Booliiska Ottawa ayaa ku caawini karaan. Shaqaalaha VCU waxay ka kooban yihiin lataliyeyaal dadka kala taliya dhibaatooyinka, qiimeynta iyo tixraaca loo diro dadka ay dhibaataada ka soo gaartay falalka dembiyada, dhibaatooyinka culus ama dhacdooyinka xasaasiga ah.

## Go'aannada Sharciga

Waxaa jiraan tallaabooyin sharciyeed oo gaar ah oo kaa caawini kara sidii aad uga hortagi lahayd in ay rabshado kale dhacaan. Waxaana kuwaan ka mid ah:

**Heshiis nabadeed** — heshiiska nabadda waa ballanqaad la saxiixay, oo qoraal ah, si nabad loo helo dhaqankuna u noqdo mid wanaagsan. Haddii aad ka cabsi qabto in saaxibkaaga/qofka xaaska ah dhibaato idiin geysto adiga ama carruurtaada, hantidada reerka, xayawaanka rabaayadda ah, waxaad codsan kartaa heshiis nabadeed. Si hawsha loo billaabo, waa in aad heshiiska nabadda ka codsato Garsooraha Nabadda, oo aad u sharraaxdo sababta aad u doonayso. Heshiiska nabadda ma aha mid xaaska/qofka aad saaxibka tihii la gelinayo galka dembiyada haddii isaga/iyada aanney jibin shuruudaha. Heshiiska nabadda wuxuu soconayaa *hal sano oo kaliya*.

**Amarka badbaadada** — ujeeddada ka dambeyso amarka badbaadada waa mid looga hortagayo in qofka xaaska/saaxibka ah in uu dhibaato idiin geysto adiga iyo carruurtaada. Waaxaad amarka badbaadada ka heli kartaa maxkamadda qoyska (amarradaan kama tirsana nidaamka xeerka dembiyada).

**Amarka heysashada gaarka ah** — haddii aad sharci ahaan tahay qof xaas ah, waxay maxkamadda qoyska amri kartaa in aad xaq u leedahay in aad ku sii jirto aqalka aad kula nooleyd saaxibka/xaaska, iyo in isaga/iyada ay tahay in uu ka baxo. Waxaa loo yaqaan “heysashada gaarka ah ee aqalka xaaska.” Waa in uu qareenka dalab u soo gudbiyo maxkamadda taasoo uu ku codsanayo amarka heysashada gaarka ah.

Waxaad kala hadashaa dad khibradda u leh si ay kaaga caawiyaan midka kugu habboon. **Sarkaalka booliiska wuxuu xiri karaa qof kasta oo jebiya heshiiska nabadda, amarka badbaadada, ama amarka heysashada gaarka ah.** Waxaad islamarkiiba wacdaa booliiska haddii saaxibkaaga ama saaxibkaagii hore uu ku xadgudbo amar ama haddii aad ka cabsi qabto in isaga ama iyada ay jebin doonaan.

## Murannada Heysashada Carruurta

Caadi ahaan, waxaa booliiska loogu yeedhaa dhaqangelinta amarrada ku saabsan xuquuqda ay waaliidiinta u leeyihiin carruurtooda. Inkastoo uu jiri karo amar oggolaanaya booqashada, **sharcigu ma siinayo booliiska awood ay ku soo dhexgalaan iyo awood ay ku dhaqangeliyaan amarka.** Haddii uu qof diido in carruurta la arko, waxaad u noqon kartaa maxkamadda bixisay amarka aragtida carruurta. Waxay maxkamadda u diri kartaa booliiska in ay doonaan ilmaha una geeyaan qofka lagu magacaabay amarka. Waxay booliiska awoodaan oo kaliya in ay ka jawaab bixiyaan dhacdooyinka lagu aragtida iyo nabadda.

## Saacadaha ay Furan Yihiin Qaybta Xaaska/Saaxibka la Dhibaateeyo

**Maalin kasta ..... 7-da AM (Subaxnimo) illaa 3-da AM (Subaxnimo)**

# Liiska Khayraadka Bulshada

## Booliiska

Xaalad degdeg ah ee nolosha khatar gelisa ama dhacdo dembi ah ee socota . . . . .	911
Xaaladaha degdegga ah ee kale . . . . .	613-230-6211
Qaybta Xaaska/Saaxibka la Dhibaateeyo . . . . .	613-236-1222, khadka. 5407
Xarumaha Booliiska Bulshada iyo codsiyada kale oo idil . . . . .	613-236-1222
TTY . . . . .	613-232-1123
Qaybta Dhibaatooyinka Dhibbanaha. . . . .	613-236-1222, khadka. 5822

## Sharciga

Adeegyada Sharciga ee Bulshada . . . . .	613-241-7008
Xarunta Macluumaadka Sharciga Qoyska . . . . .	613-239-1274
Xafiiska Sharciga Qoyska . . . . .	613-569-7448
Xarunta Maxkamadda Ottawa	
Xafiiska Maxkamadda Shacabka . . . . .	613-239-1054
Maxkamadda Qoyska . . . . .	613-239-1274
Barnaamijka Gargaarka Marqaatiga/Dhibbanaha. . . . .	613-239-1229
Xafiiska Sharciga Bulshada ee Jamacadda Ottawa . . . . .	613-562-5600

## Khadadka Dhibaatooyinka

Khadka Gargaarka Haweenka la Dhibaateeyo . . . . .	1-866-863-0511
Khadka Gargaarka Haweenka la Dhibaateeyo (waxay furan yihiin 24/7) . . . . .	613-745-4818, TTY 613-741-3556
Taleefoonka Gargaarka Carruurta . . . . .	1-800-668-6868 ama 1-800-267-7946
Xarunta Dhibaatooyinka Kufsiga ee Ottawa . . . . .	613-562-2333
Xarunta Gargaarka Kufsiga . . . . .	613-234-2266
TTY . . . . .	613-725-1657
Xarunta Dhibaatooyinka ee Ottawa iyo Gobolka. . . . .	613-238-3311
Femme-écoute. . . . .	1-877-679-2229
Tel-Aide Outaouais . . . . .	613-741-6433
Services pour femmes battues . . . . .	613-745-3665 (Codka iyo TTY)

Femaide Ligne de soutien . . . . .	1-877-FEMAIDE (1-877-336-2433)
Hay'adda Gargaarka Carruurta Ottawa . . . . .	613-747-7800
Adeegga Dhibbanaha ee Ottawa . . . . .	613-238-2762
Isbitaalka Ottawa – Xarunta Gargaarka Shacabka Barnaamijka Daryeelka Dhibaatooyinka Saaxibka/Xaaska & Kufsigu . . . . .	613-761-4366, TTY 613-761-4140

## **Hoyga Badbaadada**

Sarkaalka Booliiska wuxuu u kaxeyn karaa meel ay ku badbaado oo ay ka mid yihiin hooyayga badbaadada soo socda:

Aqalka Chrysalis . . . . .	613-591-5901
Aqalka Interval . . . . .	613-234-5181, TTY 613-234-5393
Aqalka Interval ee Degmada Lanark . . . . .	613-257-5960
La Présence . . . . .	613-241-8297
Maison d'amitié . . . . .	613-747-0020, ATS 613-747-9116
Aqalka Nelson . . . . .	613-225-3129, TTY 613-225-4653
Cornerstone/Le Pilier (loogu talagalay haweenka) . . . . .	613-237-4669
The Shepherds of Good Hope (loogu talagalay ragga) . . . . .	613-789-8210
The Ottawa Mission (loogu talagalay ragga) . . . . .	613-234-1144

## **Khayraadka Bulshada**

Xarunta Khayraadka ee Bariga Ottawa (furan 24/7) . . . . .	613-745-4818
Xarunta Khayraadka Bulshada ee Galbeedka Ottawa (Isniinta.-Jimcaha., 8:30 a.m. (subaxnimo) illaa 4:30 p.m. (galabnimo)) . . . . .	613-591-3686
Xarunta Khayraadka Nepean . . . . .	613-596-5626
Xarunta Adeegyada Bulshada iyo Caafimaadka ee Pinecrest-Queensway . . . . .	613-820-4922
Adeegyada Qoyska à la famille Ottawa (Family Services à la famille Ottawa) . . . . .	613-725-3601

Xarunta Khayraadka Galbeedka Somerset (Somerset West Community Health Centre) . . . . .	613-238-8210
Adeegyada Qoyska ee Haweenka Hijrada (Immigrant Women Services Ottawa) . . . . .	613-729-3145
Xarunta Khayraadka Galbeedka Somerset (Xarunta Adeegyada Bulshada iyo Caafimaadka ee Carlington) . . . . .	613-722-4000
Jewish Family Services of Ottawa (Adeegyada Qoyska ee Hay'adda Yuhuudda Ottawa). . . . .	613-722-2225
Adeegyada Qoyska Katoolikada ee Ottawa (Catholic Family Services Ottawa) . . . . .	613-233-8478

## Latalinta dadka dhibaataada geysta

Haddii dhaqankaagu uu dhibaateynayo saaxibkaaga/xaaskaaga, waxaa lagugu dhiirigelinayaa in aad la xiriirto barnaamijyada latalinta:

Tilmaamaha Cusub . . . . .	613-233-8478
Adeegyada Seddexgeesoodka Pink (loogu talagalay bulshada GLBT). . . . .	613-563-4818

*Adeegyada Seddexgeesoodka Pink (Pink Triangle Services) waxay bixiyaan adeegyo gaar ah oo bilaash ah/iyo latalin lacag la bixiyo. Waxaad eegtaa shabakadda internetkooda **www.pinktriangle.org** si aad u hesho macluumaad dheeraad ah.*